

QOYSKAYGU WAXAY LEEYIHIIN CARUUR DA'DA DUGSIGA AH. BAARITAAN NOOCE AH AYEY CARUURTU U BAAHANYIHIIN?

Baaritaanka caafimaadka ka sokow, foomka baaritan heersare aha aya ubadka loo buuxin doonaa si cunugaada loogu diro dugsigu, waxaana la cusboonaysiin doonaa talaaladooda si ay isku qoraan dugsigu sida ugu dhaqsaha badan.

XAGEE AAN U AADAA BAARITAANKA CAAFIMAADKA EE QAXOOTIGA?

Hay'adaha dib-u-dejinta qaxootiga ama kafaala-qaatayaashaadu waxay ku siinayaan taageerada bilowga ah ee baaritaanka caafimaadka qaxootiga, oo ay ku jirto ku xidhida rug caafimaad oo qandaraas leh oo bixisa baadhista caafimaadka qaxootiga gudaha deegaankaaga. Kuwa soo socdaa waa rug daryeel caafimaad oo qandaraas leh:

RUG CAAFIMAAD



CENTRAL DISTRICT HEALTH DEPARTMENT
1137 SOUTH LOCUST STREET
GRAND ISLAND, NE 68801 telefoonka: 308-385-5175



LINCOLN LANCASTER COUNTY HEALTH DEPARTMENT
3131 O STREET,
LINCOLN, NE 68510
402-441-8000



CHI HEALTH CLINIC – UNIVERSITY CAMPUS
2412 CUMING ST. STE. 200, OMAHA, NE 68131
402-717-0380



SIUXLAND COMMUNITY HEALTH CENTER
1021 Nebraska Street
Sioux City, IA 51105
Phone: 712-252-2477

HAY'ADAHA DIB U DAJINTA



LUTHERAN FAMILY SERVICES
LINCON-GRAND ISLAND-LEXINGTON AREAS
2301 O STREET, LINCOLN NE 68510

LUTHERAN FAMILY SERVICES
7929 W CENTER RD OMAHA, NE 68124



XARUNTA HORMARINTA QAXOOTIGA (OMAHA AND LINCOLN)
4223 CENTER STREET OMAHA, NE 68105
121 SOUTH 13th STREET LINCOLN, NE 68508
402-898-1349



CATHOLIC SOCIAL SERVICES OF SOUTHERN NEBRASKA
2241 O STREET,
LINCOLN NE 68510
402-474-1600



Good Life. Great Mission.

DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

Baarista Caafimaadka Qaxootiga

Hagaha Daryeelka Caafimaadka ee Nebraska

WAA MAXAY BAARITAANKA CAAFIMAADKA QAXOOTIGA?

Baadhitaanka caafimaadka qaxootigu waa talaabada ugu horeysa Kusocoto daryeelka caafimaadka ee Maraykanka (U.S) Waa baaritaan jireed oo dhameystiran iyo waqti lagu helo wixii dhibaato caafimaad jireed ama mid shucuureed ah oo kaa hor istaagi kara inaad shaqo hesho ama aad iskuul aado Baaritaanka caafimaadka qaxootigu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah dib u dejintaada gudaha U.S.

Dhammaan qaxootiga, magan-gelyo-doonka, sii-daynta sharafeed, iyo Kuuban/Haytiga soo-galootiga ah ee yimaadda Nebraska waa in ay maraan baadhista caafimaad.

Baadhitaankan caafimaad waxa uu ka dhacaa rug caafimaad oo kutaqasusay baadhista caafimaadka qaxootiga kaaso uu sameeyo adeeg-bixiye caafimaad. Baadhitaankaagu wuxuu u baahan yahay laba booqasho oo dhamaystiran waxaana ku jira kuwan soo socda:

- **Dib u eegis ku saabsan baaritaankaaga caafimaad ee dibadda**
- **Dib u eegista taariikhdaada caafimaad**
- **Baaritaanka guud ee jirka**
- **Baaritaanka caabuqyada**
- **Talaalka**

Waa inaad ku samaysaa qiimayntan caafimaad 90 maalmood gudahood markaad timaadid Nebraska. Waxaad codsan kartaa qof ku hadla luqadaada inuu yimaado ballamahaaga baadhista caafimaadka.



SIDEE AYEY TANI KAGA DUWANTAHAY BARITAANKA CAAFIMAAD EE DIBADDA?

Baadhitaankaagii dibadda waxa uu eegay kaliya xaalado kaa ilaalinaya inaad timaaddo Maraykanka, sida qaaxada, dhibaatooyinka jidhka ama maskaxda ee ku xidhan rabshadaha, ama la qabsiga maan-dooriyaha

IMMISA AYEY KU KACAYSAA?

Uma baahnid inaad bixiso kharashka baaritaanka caafimaadka haddii Nebraska ay tahay goobtaada ugu horreysa ee Maraykanka. Kharashka waxaa lagu dabooli doonaa mid ka mid ah laba siyaabood: 1) Haddii aad haysato kaarka Medicaid, Kaalmada Caafimaadka Qaxootiga (RMA) ayaa bixin doonta. 2) Haddii aadan haysan RMA, rugtaada waxaa laga yaabaa in lacag lagu siiyo baarista caafimaadka ee Barnaamijka Dib-u-dejinta Qaxootiga ee DHHS.

MAXAAN LA'IMAADA?

Marka lagugu sameeyo baadhistaada caafimaad, soo qaado laaabtan soo socota haddii aad heeysato:

- **Dhammaan diiwaannadaada caafimaad**
- **Diiwaanada tallaalka**
- **Liiska daawo kasta ama geedo yaryar oo aad isticmaasho**

WAA MAXAY BIXIYAHA DARYEELKA AASAASIGA AH?

Adeeg-bixiyaha daryeelkaaga aasaasiga ah waa rugta ama qof caafimaadka ku takhsusay oo si joogto ah kuu xanaaneeya, gaar ahaan haddii aad xanuunsan tahay, u baahan tahay tallaallo, ama u baahan tahay daawaynta dhibaato caafimaad.

Daryeelka aasaasiga ah macnaheedu waa in la haysto hal rug caafimaad ama bixiye daryeel caafimaad oo ku daryeela Baahiyaha daryeelka caafimaad ee socda, haddii loo baahdo, waxa uu kuu gudbinayaa takhasusle.

SIDEEEN ISKUGU DIYAARIYAA BAARITAANKA CAAFIMAADKA?

- Keen dukumeentiga laheli karo ee xubin kasta oo qoyska ka mid ah, sida l-94s, baasaboorada, diiwaanada caafimaadka, macluumaadka tallaalka guriga, iyo dukumeentiyada kale ee lagu aqoonsan karo oo laga yaabo inaad haysato
- Diyaarso cunto fudud, biyo, xafaayad dheeri ah, ama wax kasta oo kale oo aad u baahan karto inta aad sugayso. Ballanta waxay qaadan kartaa saacado badan, maadaama ay takhaatiirtu isku dayi doonaan inay arkaan qoyskaaga oo dhan hal maalin gudaheed si ay u xaddidaan tirada jeer ee aad u safreysa xarumahooda.
- Waqti fiican imow si aad uga fogaato dib u dhac ama baajinta Markii ballan lagu siiyo, fadlan wakhti fiican imow si qoyska xiga loo arko waqtigii loogu talagalay.
- Haddii ay timaado xaalad ama baahi degdeg ah, u sheeg maareeyaha kiiskaaga haddii aadan ballan qabsan karin.

MAXAAN KA FILAN KARAA BAARITAANKA CAAFIMAADKA?

- Marka hore, waxaad la xiriiri doontaa qofka shaqaalaha ah ee jooga qaybta so dhaweynta
- Marka xigta, waxaad fadhiisan doontaa qolka sugitaanka si lagugu yeedho oo aad u aragto dhakhtarka/kalkaaliyaha. Fadlan ha bixin marka laga reebo xaalad degdeg ah. Haddii aad u baahan tahay inaad isticmaasho musqusha, ka labalabayn inaad waydiiso meesha ay ku taal.
- Marka ay tahay gortada, waxaa lagu tilmaami doonaa qolka baadhista gaarka ah halkaas oo dhakhtarka/kalkaaliyaha caafimaadku ay ku baadhi doonaan dhammaan xubnaha qoyskaaga.
- Inta lagu kudajiro baaritaanka, Dhakhtarka/kalkaaliyaha ayaa sameyn doona baaritaan jireed waxayna ku weydiin doonaan su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga jirka iyo shucuureed.
- Dhakhtarka, kalkaalisada, ama shaqaalaha waxay u baahan doonaan inay ogaadaan xubin kasta oo qoyska ka mid ah magaciisa oo dhamaystiran, taariikhda dhalashada iyo cinwaanka. Fadlan xaqiiji in aad qoratay macluumaadkaaga
- Marka la dhammeeyo baaritaankaaga, waxaad codsan kartaa nuqul daabacan oo foomka baarista caafimaadka ah ee diiwaannadaada.

- Fadlan ogow in dhammaan baaritaannada ay u baahan yihiin baaritaanka dhiiga. Baaritaankaan waxaa lagu dhameyn doonaa rugta caafimaadka ama waxaa loo qorsheeyn goob kale.
- Fadlan hubi inaad dhammaystirto baaritaannada, waqti fiicana imow ballamaha daba-galka ee imaan kara Baadhitaankaaga caafimaadka waxa lagu dhammeeyaa laba booqasho gudahood, markaa adiga ballamaha xiga waa muhiim.

MAXAY YIHIIN XUQUUQHAYGA INTA BAARITAANKA CAAFIMADKA SAMAYNAYO?

- Xubin kasta oo qoyska ka mid ah wuxuu xaq u leeyahay inuu la mid noqdo daryeelka xirfadeed iyo adeegyada.
- Waxaad xaq u leedahay adeegyo tarjumaad bilaash ah.
- Waxaad xaq u leedahay inaad muujiso rabitaankaaga in ku arko dhakhtar jinsi gaar ah. Weydii maamulaha kiiskaaga ballanta kahor. Waxay la xiriiri karaan rugta caafimaadka si ay isugu dayaan in ay tan u diyaariyaan.
- Waxaad xaq u leedahay inaad keento wehel qolka baaritaanka. Fadlan ogow in tilmaamaha rugaha caafimaadka ay mararka qaarkood xaddidaan tirada dadka loo oggol yahay qolka.
- Waxaad xaq u leedahay xogtada la qariyo, oo lagu ilaaliyo Sharciga Maraykanka ee HIPAA. Dhammaan macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed iyo xogahaaga caafimaadka waxay ahaan doonaan kuwo qarsodi ah.

